

# 2024 Dib u eegista Kirada

## Taageerooyinka kiraystaha

Dib u eegista kirada suuqa ee 2024 dib ayaa loo dhigay **Ogosto ayay ahayd in la sameeyo waxaana dib loo dhigay ilaa Nofeembar 2024** si markaas loo siyo kiraystayaasha wakhti dheeraad ah oo ay ku qorsheyn karaan isbeddelka kiradooda.

### Lacagta kirada lagu kabo

Dhammaan kiraystayaasha guryaha dadweynaha ee Victoria waxay codsan karaan lacagta kirada lagu kabo ee loo yaqaan rental rebate.

Lacagta kirada lagu kabo waa farqiga u dhixeyya 25 boqolkiiba wadarta dakhliga la qii mayn karo ee dhamaan xubnaha qoyska iyo kirada suuqa ee guriga.

Kabista kirada waxay ka difaacdaa kiraystayaasha inay bixiyaan wax aan ka badnay boqolkiiba 25 dakhliga qoyskooda taasina aad bay uga duwan tahay suuqa kiraynta gaarka ah.

Kiraystayaashu waxay codsan karaan wakhti kasta lacagta kirada looga kabo iyaga oo macliuumaadka ku saabsan qoyskooda iyo dakhliga soo gala soo gelinaya Adeegyada Online ka ee Housing Vic ama iyagoo buuxinaya foomka codsiga (guji linkiga hoose). Fadlan u dir tan xafiiska guryeynta ee xaafadaada.



[housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates](http://housing.vic.gov.au/market-rent-and-rental-rebates)

### Fasiraada



[www.homes.vic.gov.au/rent-review-translations](http://www.homes.vic.gov.au/rent-review-translations)

Taageero kala duwan ayaa la heli karaa haddii kiraystayaasha ay dareemayaan in kiradoodu aad u sarreyo. Kuwaas waxaa ka mid ah:



**Lacagta kirada lagu kabo**



**Kaalmada loogu talagalay dadka culeys dhaqaale la kulmaya**



**Adeegyada la-talinta dhaqaalaha iyo badqabka**



### Kaalmada loogu talagalay dadka culeys dhaqaale la kulmaya

Si aad xaq ugu yeelatid kabitaanka loogu talagalay dadka culeys dhaqaale la kulmaya, kireystayaashu waa inay hore u dalbadeen lacagaha looga kabayo kirada, ayna soo buuxiyaan mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- waa in deyn lagu leeyahay
- waa inay leeyihiin xaalad caafimaad ama xanuu ka hor istaagaya inay helaan dakhligoodii caadiyan ay heli jireen, ama
- haddii ay jiraan duruufo kale oo keenaya culays dhaqaale.

Si aad u codsato kabitaanka la xiriira culeyska dhaqaale, kiraystayaasha waxay la xidhiidhi karaan xafiiska guriyaynta ee deegaankooda kaas oo siin doona foomka kabitaanka dib u eegista kirada ee 2024, iyo haddii loo baahdo, waxay ku siin karaan caawimo la xiriirta buuxinta foomka.

Kireystayaasha horey u codsaday caawimaad dhaqaale, codsiyadooda waa la hayn doonaa, waxaana lala xiriiri doonaa marka ogeysiiska kirada cusub la soo saaro.

Haddii kireystayaasha ay qabaan wax su'aalo ah oo ku saabsan nidaamkan, waxay la xiriiri karaan xafiiska guryeynta ee xaafadooda.



### Adeegyada la-talinta dhaqaalaha iyo badqabka

Dhammaan kiraystayaasha guryaha dadweynaha waxay Tenants Victoria iyo Xarunta Sharciga Waxqabadka Macmilka (Consumer Action Law Centre) ka heli karaan adeegyo la-talin maaliyadeed oo lacag la'aan ah isla markaasna qarsoodi ah iyo adeegyada badqabka.

#### Sida kiraystayaasha guryaha dadweynaha ay u heli karaan adeegyada

Si aad u hesho adeega latalinta maaliyadeed ee ay bixiyaan **Tenants Victoria**, kireystayaasha waxay awoodi karaan:

- Inay iimayl u diraan **financialcounselling@tenantsvic.org.au** (doorbid). La-taliye dhaqaale aya markaas kula soo xiriiri doona si uu kuugu diyaariyo waqtii ku habboon.
- Ka wac Tenants Victoria khadka taleefanka **03 9411 1444** inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimmo ilaa 5-ta galabnimo maalmaha shaqada.

Si aad u hesho adeega latalinta maaliyadeed ee ay bixiso **Xarunta Sharciga Waxqabadka Macmilka**, kireystayaasha waxay karaan:

- Inay wacaan khadka caawinta deynta qaranka **1800 149 689**
- **Riix xalka 1aad** (kiraystayaasha ku nool guryaha dadweynaha)

- Booqo shabakada khadka caawinta deynta qaranka ([www.ndh.org.au](http://www.ndh.org.au)) oo la hadal NDH Chat la-taliye maaliyadeed oo dhab ah

Kiraystayaasha laga yaabo inay u baahdaan caawinaad turjubaan, tan waxaa loo diyaarin karaa marka la codsado.

Faahfaahinta xiriirka kor ku xusan waxaa sii dheer, adeegyadan ayaa si toos ah loogu gudbin karaa iyadoo lala xiriirinayo iimaylada soo socda:

- [ndh@consumeraction.org.au](mailto:ndh@consumeraction.org.au)
- [financialcounselling@tenantsvic.org.au](mailto:financialcounselling@tenantsvic.org.au)

Somali | Soomaali



Waxaa oggolaatay oo daabacday Dowlaadda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Homes Victoria (Agaasimaha Guriyeenta), September 2024.

### Su'aal ma qabtaa?



[www.homes.vic.gov.au/rent-review](http://www.homes.vic.gov.au/rent-review)



[enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au)